
# Dastuurka

Jamhuuriyada Dimoqraadiga

**Soomaaliya**

1979

By: Mahdi Ghandi



## Gogoldhigga Dastuurka

Shacbiga Somaaliyeed wadajir iyo midnimo ugu halgamaya nolol sharaf leh & sinaan Aadanimo ee qaayo leh dagaalna ugu jira xasiloonida iyo nabaddda joogtada ah gudaha iyo dibedaba, si uu u fuliyo himilooyinka Waaweeyn ee Kacaankiisa midnimada ummadiisa, hirgelinta dhismaha Hantiwadaagg si uu u gaaro bulsho ku dhisan  Cadaalad, Sinaan iyo Dimoqraadiyad ijtimaaci ah ee qofkeedu gaaray garad sare tiro iyo  tayaba ahaanba, una adkeeyo tiirarka Kacaankiisa iyo Gobanimadiisa qiimaha weyn ugu fadhiya ,dabadeedna u gaaro horumar degdeg siyaasadeed dhaqaale iyo Bulshaba wuxuu go,aan ku gaaray inuu qaato Dastuurkan saldhig u noqon doona halganka horumarinta Bulashada Soomaaliyeed, nabad isku noolaashada, iskaashiga iyo wax wada qabsiga Ummadada Adduunyweynha,gaar ahaan kuwa  ay dantoodu si gaar ah isugu xirmi karto**.**

# Qaybta kowaad

Mabaadii'i guud

# Xubinta Kowaaad

# Jamhuuriyada

## Qodobka 1aad

## ( Qaranka Soomaaliyed )

**1.**Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa Qaran Hantiwadaaga ah oo ay hogaaminayso dabaqadda xoog-Satada ah waana qayb ka mid ah Ummadda Carabta iyo Shucuubta Africa.

**2.**Awooda oo dhan waxaa leh wuxuuna ugu isticmaalayaa isagoo adeegsanaya hay'adiisa masila

## Qod. 2aad

( **Calanka Astaanta iyo Magaalomadax )**

**1.**Calanka Qaranka midabkiisu waa Buluug furan muuqaalkii-suna Waa laydi ay dhexda kaga taal Xiddig cad oo Shan geesley ah, Madaxyo siman leh

**2.**Astaanta Somaaliyeed waxay ka koobantahay Gaashaan Buluug ah oo leh Xaddiyad Dahabiya dhexdana ku leh Xiddig Shan geesley ah oo dheeh qalin ah leh,Gaashaa-nka dushiisa waxaa ku yaala Rukumo Carbeed oo xardhan lehna shan madax oo Dahabiya oo labada geesaha ku yaalli ay kala qaaranyihiin,hareeraha waxaa ka haya labo Shabeel oo dabiici ah isuna tusmaysan, kuna kala taagan Labo waran oo isku weydaaranaya caarada hoose ee Gaashaanka, ayna weheliyaan Labo Caleen cawlbaar oo Dabiici ah,diilin cadina ay ku qafaalantahay.

**3.** Magaalo Madaxda Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya waa Muqdisho ( Xamar )

## Qod. 3aad

## ( Diinta iyo Afka )

**1** Diinta Islaamku waa Diinta Qaranka

**2.** Af Soomaaligu waa afka kaliya  ee Shacbiga Soomaaliyeed ku wada hadlo iskuna wada garto,Afka Carabiguna waa afka Shacbiga Soomaaliyeed waana midka ku xiriiriya Ummada Carbeed oo uu ka midka yahay, Labadubana waa Afafka rasmiga ah ee Jamuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya

## Qod.4aad

**( Midnimada Shacbiga Soomaaliyed )**

**1.** Shacbiga Soomaaliyeed waa Shacbi mid ah Jinsiyada Soomaaliyeed waa mid qura (kaliya )

**2.** Sharciga ayaa xaddidaya sida lagu helayo ama lagu waayayo Jinsiyadda Soomaaliyeed

## Qod.5aad

## ( Dhulka Qaranka )

**1**.Dhulka Qaranku waa muqadis waxay koobaysaa .Berriga Jasiiradaha, Biyaha Goboleed, Dhulka uurkiisa hoose hawada sare iyo Xeebaleyda.

## Qod. 6aad

## ( Sinaanta Muwaaddinimiinta )

Muwadiniinta oo dhan, iyagoon loo eegin lab iyo dhedig Diin, Dhalasho iyo af toona, xuquuqda iyo waajibaadka way u simanyihiin sharciga hortiisa.

# Xubinta Labaad

## Xisbiga

### Qod.7aad

(Awooda iyo Hogaanka Xisbiga)

1. Xisbiga Hantiwadaaga Kacaanka Soomaaliyeed waa Midka qur ah ee ka jira Dalka Jamhuuriyada Dimuqraadiga Soomaliya lamana abuuri karo Xisbi kale ama Urrur Siyaasi ah.

2. **X**isbiga hantiwadaaga Kacaanka Soomaaliyeed ayaa leh awooda ugu sareysa ee Hogaaminta Siyaasadda dhaqaalaha iyo Bulshada Jamhuuriyada Dimoqradiga Soomaaliya

### Qod. 8aad

**( Midnimada Hogaanka Dalka )**

**H**ogaaminta Dalku waxay ku dhisan tahay Midnimada hogaanka siyaasaded ee Xisbiga iyo kan Qaranka

### Qod.9aad

( **Doodaha ,Go,aanka iyo Fulinta )**

1. **H**ay,adaha Siyaasadeed ee la doortaa waxay ka shaqeynayaan heer kasta oo ay yihiin mabda'a Wadarta Doodaha. aqlabiyada go'aanka iyo u wadajirka fulinta.

2. **H**ay'adaha Xisbiga Dhexdoodaa, mabda'aasi wuxuu furayaa aragti, dareen iyo doonis mideysan iyo isku duubni shaqo

## Qod. 10aad

**( Iskaabidka Waajibaadka Xisbiga iyo Qaranka )**

Hay,adaha Xisbiga iyo kuwa Qaranku waxay qabanayaan hawlaha mid kasta ah ee sharciyadu tilmaamayaan iyagoo u maraya Jidad kala duwan, si ay u gaaraan ujeedo mid ah

**1.** Abaabulka siyaasadeed ee Dalku wuxuu ku dhisanyahay iskaabida waajibaadka hay'adaha Xisbiga iyo kuwa Qaranka sida sharciyada ay ku dhisan yihiin tilmaamayaan.

## Qod. 11aad

( Xeerka Xisbiga )

Qaabka dhismaha haya'adaha Xisbiga iyo shaqadooda waxaa caddeynaya xeerka Xisbiga Hantiwadaaga Kacaanka Soomaliyeed.

## Qod. 12aad

( Ururrada Bulshada )

**1.** Qaranku wuxuu jideynayaa dhismaha ururro Bulsho oo ka kooban Shaqaale, Iskaa-shatooyin, Dhalinyaro & Haween

**2.** Ururrada Bulshadu waxay u dhismayaan heer Qaran heer Degaan, heer wax soo sar iyo xarun waxbarsho

**3.** Dhismaha, xeerarka iyo Barnamijyad agaar ahaaneed ee Ururrada Bulshadu waa inay waafaqsanadaan danaha guud ee Dadweynaha, Dastuurka ,Xeerka iyo barnaamijka Xisbiga Hantiwadaaga Kacaanka Soomaliyeed.

## Qod. 13aad

**(Awooda iyo waajibaadka Ururrada Bulshada )**

Ururrada Bulshada waxay ka qaybgalayaa,si waafaqsan waajibaadka Xeerarkooda gaar ahaaneed u xilsaarayaan hogaaminta arrimaha Qaranka iyo Bulshada, iyo xalinta arrimaha la xiriira siyaasadadhaqaalaha Bulshada iyo dhaqanka

### Qod. 14aad

**( Dimoqraadiyada iyo Gudoonka dhexe )**

Abaabulka iyo hawlaha Xisbiga iyo Xisbiga Qarankaba waxaa saldhig u ah mabda'a Dimoqraadiyada Gudoonka dhexe.

# Xubinta. 3aad

## ( Siyaasadda Dibedda )

### Qod. 15aad

**( Mabda'a Aayakatalinta )**

1. Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaliya waxay aaminsan-atahay Mabda'a aaya ka talinta Dadyowga Adduunka, waxayna si buuxda u taageeraysaa dhaqdhaqaaqyada goba-nimadoonka iyo dhamaan dadyowga u halgamaya xornimad-dooda iyo Madaxbanaanidooda.

2. Waxay si adag uga soo horjeedaa gumaysiga ,Gumaysiga cusub imeryaalida caalamiga ah iyo Midabtakoorka

### Qod. 16aad

## ( Dalalka Soomaaliyed ee la gumaysto )

Jamhuuriyad Dimoqraadiga Soomaaliya iyadoo ku istic-maalaysa dariiq nabadgelyo iyo qaanuun,waxay taageer-aysaa xoreynta Dalalka Soomaaliyed ee weli ku jirra gaca-nta Gumaysiga.waxayna soo dhaweynaysaa midowga Shacbiga Soomaaliyeed ee ku yimaad dariiq nabadeed Iyo rabitaanka Dadka ay khuseyso.

### Qod. 17aad

**( Siyasaasada dhexdhexaadka iyo Nabad-kuwada noolaanshaha )**

1. Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya waxay ku soconay-saa siyaasada dhexdhexaadka wax ku oolka ah

2. waxay si buuxda u aqoonsantahay mabda'a kuwada noolaa-nshada Dadyowga Aduunka

## Qod. 18aad

( Siyaasada wax-wada qabsiga )

Jamhuuriyada Dimoqraadiga soomaaliya waxay horumarinay-saa siyaasadda wax wada qabsiga Dadyowga iyo Qaramada Adduunka ee ku dhisan kala faa'iidaysiga ,sinaanta iyo xurme-ynta, Gobonimada iyo habka siyaasadeed ee qola kasta u Gaarka ah.

## Qod. 19aad

( Qaanuunka dawliga ah )

Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaliya waxay aqoonsatahay Baaqa Calamiga ah ee Xuquuqda Aadamiga iyo Qaanuunka Dawliga ah ee guud ahaan la aqonsanyahay.

# Qaybta.Labaad

**Xuquuqda , Xoriyaadka iyo Wajibaadka Asaasiga ah ee Muwaadinka iyo Qofka**

## Qod. 20aad

**Xuquuqda siyaasiga,Dhaqaalaha, Bulshada, iyo Hidaha**

Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qaybgalo hawlaha Siyasadeed,dhaqaale,bulsho iyo Hiddahaba si waafaqsan Dastuurka iyo Shuruucda.

## Qod. 21aad

( Xaqa Shaqada )

**1**.Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay Shaqo Shaqadu waa waajib ,sharaf iyo saldhiga Bulshada Hantiwadaaga ah

**2**.Qaranku wuxuu hurumarinaya abuurista goobo shaqo si loo xaqiijiyo xaqa Muwaadinka ee shaqo

## Qod. 22aad

( Xaqa Doorashada )

Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha sharcigu tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay inuu wax doorto lana doorto

## Qod. 23aad

( Xaqa Tacliinta )

Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay tacliin lacag la'aan ah.

## Qod. 24aad

**( Xoriyadda banaanbaxa,faafinta qoraalada iyo ra'yiga )**

**1**.Muwaadin kasta wuxuu xor u yahay in uu ka qayb galo kulan,banaanbax ama abaabulkooda.

**2**.Wuxuu kaloo Muwaadinku xor u yahay daabacaada qoraallada, hadalka iyo bandhiga ra'yigiisa si kastaba haku muujiyee

**3**..Ku isticmaalka xorriyadaha ku qoran lambarka 1aad iyo 2aad ee qodobkan waa inaysan ka hor iman Dastuurka iyo Shuruucda Dalka, anshaxa guud iyo xasiloonida Dalka,waxna u dhimin Xoriyadda muw-adiniinta kale.

## Qod. 25aad

**( xaqa nolosha iyo Nabad gelelinta Qofka )**

**1**.Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay noloshiisa iyo nabadgelinta qofnimadiisa

**2.**Sharciga ayaa tilmaamaya xaaladaha qofku ku muteysan karo ciqaab dil.

## Qod. 26aad

## ( Xorriyadda Qofnimo )

**1**.Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay xorriyadiisa shakhsiga ah

**2**. Qofna lama xiri karo ,xorriyadiisa qofnimo ciriiri lama gelin karo hadii aan loogu imaan isagoo denbi faraha kula jira ama aan lagu qaban amar ka soo baxay Hay'adaha garsoorka ee awooda sharciyeed u leh, iyadoo la raacayo habka Sharcigu tilmaamayo

**3.**Qofkii nabad sugid awgeed loo xiro waa in si degdeg ah loo horgeeyo Hay'adaha Garsoorka ee awooda Sharciyeed u leh dembiga loo haysto, muddada Sharcigu farayo dhexdeeda

**4**.Qof kasta ee xoriyaddiisa shakhsi ah laga qaado waa isla mark-iiba la ogaysiiyaa dembiga lagu tuhunsanyahay.

**5**.Qofna shakhsi ahaan looma baari karo hadii aysan jirin shuruu-Daha ku tilmaaman lambarka 2aad ee Qodobkan ama shuruud-cda ku saabsan arrimaha la xiriira Garsoorka,Caafimaadka iyo Maaliyada ama nabadgelyo awgeed, iyadoo markaas la raacayo habka sharcigu tilmaamayo, lana dhowrayo sharafka iyo xurmada qofka.

## Qod.27aad

### (Nabadgelinta qofka xorriyadiis shakhsiga ah laga qaado )

**1**.Qofka xoriyaddiisa shakhsi laga qaado looma gaysan karo Waxyeelo jirkiisa ama niyadiisa (moraalkiisa )

**2.**Ciqaabta jirku waa mabnuuc

## Qod.28aad

( Lahaashaha gaar ahaneed )

**1**.Lahaanshaha gaar ahaneed waa la damaana qaadayaa Shar-ciga ayaana xadddidaya dariiqada lagu kaabi karo ama lagu waayi karo,nuxurkeda iyo xuduuddeeda isticmaalkeda si loo ilaaliyo doorka Bulshada ee ay leedahay

**2.**Isticmaalka lahaanshaha gaar ahaaned waa in uusan marnaba wax u dhimin danta guud ee Bulshada,waana in uusan ka hor imaan ujeedooyina Kacaanka.

**3**. Lahaanshaha gaar ahaaned waxaa lagula wareegi kara dan Guud gebi ahaanted ama si ku meel gaar ah.iyadoo qofkii lahaa la siinayo Cawilcelin munaasib ah

## Qod. 29aad

( Xurmada Hoyga )

Qofna Gurigiisa ama meeshii kale isaga u gaar ah lama geli karo, hadii ayna jiirin shuruudaha hoos ku xusan Lambarka 2aad iyo 5aad ee Qodobka 26aad

## Qod. 30aad

**( Xoriyadda isgariinta )**

Qarsoodig warqadaha iyo waxyaalaha kale ee war isgaar-siinta la xiriira lama fara gelin karo, hadii aysan jirin Shuruudaha Sharcigu tlmaamayo.

## Qod. 31aad

## ( Xoriyadda Diinta )

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu rumeeyo Diinta ama Caqiidadii kale ee uu aaminsanyahay.

## Qod. 32aad

## ( Xaqa dacwada iyo is difaaca )

**1**. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dacawad sharciga Waafaqsan ka furto Maxkamadda awooda leh.

**2**. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu iska difaaco Max-Kamadda horteeda.

**3.** Xaalada sharcigu tilmaamayo,Qaranku wuxuu kafaalo qaadayaa inuu bixiyo difaac lacag la'aan ah

## Qod. 33aad

## ( Mas'uuliyadda Ciqaabta )

**1.** Mas'uuliyadda ciqaabtu waa Shakhsi.

**2.** Eedaysanuhu wuxuu la mid yahay Qof aan embi gelin Ilaa maxkamadi si kama dambeys ah ugu caddeyso dem-biga loo haysto .

## Qod. 34aad

## ( Dib u noqosho laáanta Sharciga Ciqaabta )

Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu ku kacay sharcigu dembi uusan u aqoonsanayn, sida aan loogu xukumi karin ciqaab aan sharciga ku xusnayn.

## Qod. 35aad

### Isucelinta eedeysanaha ama dembiilaha iyo magangelyada Siyaasadeed

**1.** Jamhuuriyadda dimpqraadiga Soomaaliya dib waa u celin kartaa Qof dembi ka soo galey Dalkiisa ama dal kale oo ku soo cararay Dalka Soomaaliyeed, hadii uu jiro heshiis dhexmaray Qaranka iyo kan soo weydiistay celinta Eedaysanaha ama Dembiilha.

**2.** Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaalya waxy siin kartaa xaq magangelyo siyaasadeed Qofkii uga soo carara Dalkiisa ama Dal kale cadaadin siyasadeed awgeed, iasagoo u halgamaya daryeelka danaha Dadweynaha, xuquuqda Aadamiga ama nabadgelyo.

## Qod. 36aad

### ( Ilaalinta Hantida guud

Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah ilaalinta iyo xoojinta danaha guud.

## Qod. 37aad

### ( Ka qayb galka kobcinta Dhaqaalaha Dalka )

Qof kasta waxaa waajib ku ah inuu ka qayb qaato Dhaqaalaha,Dalka, bixinta cashuuraadka iyo ka qayb-galka kharashka Qaranka si waafaqasan awoodiisa iyo shuruucda Dalka

## Qod. 38aad

### ( Difaaca Dalka Hooyo )

Difaaaca Dalka Hooyo iyo adkaynta midnimada Shacabka Soomaaliyeed waa waajib muqadas ah oo saaran Muwaadin kasta.

## Qod. 39aad

Qof kasta waxaa waajib ku ah inuu si daacad ah u dhowro Dastuurka iyo shuruucda Qaranka

# Qaybta Saddexaad

## Saldhiga dhaqan dhaqaale

## Xubinta Koowaad

## ( Dhaqaalaha )

### Qod. 40aad

### ( Horuumarinta Dhaqaalaha )

**1**.Qaranku wuxuu horuumarinayaa dhaqaalaha Dalka iyo kordhinta wax soo saarka isla markana wuxuu xaqiijin-ayaa in si caddaalad ah dadweynaha wax loogu qaybsho

**2**.Si loo dedejiyo horumarinta Dalka, Qaranku wuxuu Dhiiri galinyaa mabda'a Iskaa wax u qabso.

### Qod. 41aad

### ( Qaybaha Dhaqaalaha )

Dhaqaalaha Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya wuxuu ka kooban yahay qaybaha soo socda

**Qaybta Hantida Qaranka:**
oo ah horseedka horuumarinta dhaqaalaha Dalka lehna mudnaan gaar ah

**Qaybta Hantida Iskaashatooyinka :**
oo lagu horuumarinayo Dhaqaalha Xubnaha Iskaashatooy-inka , isla markaana lagu kobciyo dhaqaalaha guud ee Dalka Qarankuna qorshaheeda iyo horuumarinteeda ka qayb galo

**Qaybta Hantida gaar ahaaneed :**
oo ah lahaansho gaar ahaneed ee aan ku dhisnayn isku dul noolaasho

**Qaybta Hantida isku Dhafka ha:**
oo ah Hanti ay wada leeyihiin Qaranka Soomaaliyeed & cid kale

## Qod.  42aad

### ( Khayraadka Dhulka iyo Badda )

**1.**Dhulka, khayraadka dabiiciga ah iyo kuwa Badda iyo Berrigaba waa Hanti Qaran

**2**.Sida ugu haboon oo khayraadkaas looga faa’iidaysanayo Qaranka ayaa Sharci ku habeynaya

## Qod. 43aad

### ( Qorshaha Dhaqaalaha )

**1.** Dhaqaalaha dalku wuxuu ku dhisanyahay qorshe Qaran ee Hantiwadaaga ah

**2.** Qorshuhu wuxuu leeyahay awood Sharci oo ka sareysa tan Shuruucda kale.

**3.** Waxaa jiraysa hay’ad sare ee qorshaha Qaranka, Sharciga ayaana tilmaamaya  qaabka dhismaheeda, waajibaadkeeda iyo awoodeeda

## Qod. 44aad

### ( Ganacsiga Dibedda iyo Gudaha )

Qaranku wuxuu hogaaminayaa ganacsiga dibedda iyo gudaha isagoo ku hirgelinaya horuumarinta dhaqaalaha Dalka

## Qod. 45aad

### (  Ilaalinta Lacagta )

Qaranku wuxuu habeynayaa nidaamka Maalliyadda ee Dalka, wuxuuna Sharci ku goynayaa Cashuuraha.

# Xubinta Labaad

## Horuumarinta Tacliinta iyo Cilmiga

### Qod. 46aad

### ( Tacliinta )

**1**.Qaranku wuxuu mudnaan gaar ah siinayaa horumarinta balaarinta, iyo faa'iidayntaTacliinta iyo Cilmiga wuxuuna Tacliinta u arkaa maalgelinta ugu haboon ee kaalinta ugu weyn ka qaadanaysa horuumarinta Dhaqaalaha & Bulshada Soomaaliyeed.

**2**.Tacliinta Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa mid u danaynaysa dabaqadda xoogsada ah. kuna habysan waayaha iyo deegaanka gaar ahaaneed ee Bulshada Soomaaliyeed

**3.**Tacliinta farsamada iyo xirfaddu waxya leeyihiin mudnaanta koowaad.

### Qod. 47aad

### ( Tacliinta Khasabka ah )

Jamhuuriyadda Dimqraadiga Soomaaliya Tacliintu waa Lacag la'aan, waan khasab ilaa Dugsiga dhexe.

### Qod. 48aad

### ( Ciribtirka Jahliga )

Ciribtirka qoris iyo akhris la'aanta iyo waxbarashada Dadka waaweyn waa waajib Ummadeed, waana in Dadweynaha iyo Qarankaba awooda la isugu geeyaa fulinta waajibkaas.

### Qod. 49aad

### ( Horuumarinta Cilmiga iyo adabka )

**1**.**Q**aranku wuxuu horuumarinayaa Cilmiga iyo adabka wuxuu-na dhiiri galinayaa hindisaha cilmiga iyo adabka

**2.** Xaquuqda qoraalka iyo hindisaha sharci ayaa habeynaya

### Qod. 50aad

### ( Dhalinyarada iyo isbooriga )

Si dhalinyarada loogu xaqiijiyo kortaanka jir & maskaxeed ee caafimaad qaba, barbaarintooda iyo garadkooda siyaasa-deedna kor loogu qaado, Qaranku wuxuu ahmiyad gaar ah siinayaa horuumarinta & dhiirigelinta cayaaraha jirka & isb

## Xubinta Saddexaad
## Dhaqanka iyo Daryeelka Bulshada

### Qod. 51aad
### ( Horuumarinta Hiddaha iyo dhaqanka )

**1.**Qaranka wuxuu horuumarinayaa hiddaha iyo dhaqanka horuus-ocodka ah ee Shacbiga Soomaaliyeed, iyadoo isla markaa laga faa'iidaysanayo aqoonta Caalamiga ah ee Bulshada Aadamiga

**2**.Wuxuu dhiiri gelinayaa Fanka, Suugaanta iyo Ciyaaraha waddan-iga ah ee Dadweynaha

**3**.wuxuu ilaalinayaa,daryeelaya. Waxyaabaha horuumarinta Taa-riikhiga ah ee Dalka.

### Qod. 52aad
### ( Caadooyinka Bulshada )

**Q**arnku uxuu dhowrayaa caadooyinka hagaagsan, wuxuuna Bul-shada ka xoreynayaa caadooyinka haraaga ah, iyo kuwa laga dhaxley gumaysiga, gaar ahaan Qabiilka, eexda gobolaysiga iwm

### Qod. 53aad
### ( Xannaanadda dhalaanka )

**Q**aranku wuxuu horuumarinayaa guryaha xannaanada Caruurta & xarumaha dhallinta Kacaanka.

### Qod. 54aad
### ( Horuumarinta Miyiga )

**Q**aranku wuxuu xoojinyaa barnaamijka joogtaynta ololaha horuumarinta Reer Miyiga si loo tirtiro Jahliga laysuguna soo dhaweeyo nolosha reer Miyiga iyo reer Magaalka.

### Qod. 55aad
### ( Caafimaadka )

**Q**aranku**,** isagoo fulinaya Siyaasadda daryeelka Caafimaadka guud , wuxuu xoojinayaa ka hortaga Cudurrada faafa,daryeelka nadaafadda guud iyo daaweynta lacag la'aanta ah.

## Qod. 56aad

### ( Daryeelka Qoyska )

1. **Q**aranku wuxuu daryeelayaa Qoyska isagoo u arkaya aasa-aaska Bulshada.wuxuuna taakulaynayaa Hooyada iyo ilmaha

2. **Q**aranku wuxuu iska xilsarayaa xannaanada nadaafada,carru-urta aan Waalidkood la aqoon iyo Dadka Duqooba, hadayna lahayn cid kale oo xannaanaysa.

**3**. **Q**aranku wuxuu kafaala qaadayaa Carruurta waalidkood ku geeriyooday Difaaca Dalka

## Qod.57aad

### ( Shaqada iyo Shaqalaha )

**1.Q**aranku wuxuu dhowrayaa, horuumarinayaana shaqada iyo noocyadeeda kala duwan

**2.** Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, da'da ugu ugu yar ee shaqada loo qaadan karo waa **15 sanno.**

**3.** Xoogsatadu waxay xaq u leeyihiin , iyadoo aan sina loo kala soocin Mushar u dhigma hawsha ay qabtaan iyo qiimaheeda.

**4**.Xoogsatadu waxay xaq u leeyihiin nasaho Toddobaad iyo fasax Sannadeed.

**5**.Sharcigu wuxuu xaddidayaa saacadaha , shaqada, habka Dadka loo qaadan karo shaqooyinka qarkood.

## Qod. 58aad

### ( Qiimaynta Shaqada )

Qiimaynta Shaqada Qaranku wuxuu ku dabaqayaa mabda'a
Qof kasta inta ay kartidiisu le egtahay inuu qabto
Qof kastana inta ay shaqadiisu le'egtahay inuu qaato

## Qod. 59aad

## ( Taakulaynta iyo badbaaddinta Bulshada )

**Q**aranku wuxuu horuumarinayaa habka Taakuleynta iyo badbaadinta Bulshada. wuxuuna xoojinayaa hay'adaha Caymiska guud ee Dalka.

## QAYBTA AFRAAD

**Qaabka Dhismaha Qaranka**

Madaxda kowaad

Golaha Shacbiga

## XUBINTA KOOWAAD

Nidaamka iyo Hawlaha Golaha Shacbiga

## Qod. 60aad

## ( Awooda Sharci dejinta )

**1**.Awooda shacbigu wuxuu ka koobanyahay xildhibaano Dadeynuhuna ku soo doortay Madaxbanaani, toos iyo qarsoodi

**2.**Xilka Xildhibaannimaada Golaha Shacbiga waxaa loo dooran karaa qof kastoo Soomaali ah oo da'diisu ay gaartay 21sanno. Shacbiga ayaa xaddidaya xaaladaha qofka aan la dooran karin.

**3**. Tirada Xildhibaannada. Shuruudaha iyo habka doorash-ada waxaa tilmaamayaa sharci gaar ah.

**4**.**M**adaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Somaliya wuxuu u magacaabi karaa .Xildhibaanimada Golaha Sha-cbiga ilaa lix qof oo laga dhex doorto Dadka si gaar ah ugu soocmay goobaha Cilmiga adabka iyo fanka ama leh qiimo sare ee Waddaninimo.

## Qod. 62aad

## ( Muddada Xilka )

**1.** Muddada xilka Golaha Shacbiga waa shan sanno, laga bilaabo maalinta la soo saaro natiijada doorashada

**1.** Markii ay timaado duruuf suurta gelinweyda in doorasho la qabti, Madaxweynaha JDS isagoo la tashaday Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaaga Soomaliyeed wuxuu awood u leeyahay inuu muddada ku kordhiyo waqti aan hal sanno ka badan.

## Qod. 63aad

## ( Kala dirida Golaha Shacbiga )

**1**.Golaha shacbiga waa la kala diri kara isagoon wakhtigiisu dhamaan, marka ay talo ku soo jeediyaan saddex melood meel Xildhibaanada Goluhu ,ayna isku raacaan saddex meelood labo.

**2.**Waxaa kale oo kala diri kara Madaxweynaha Jamhuuriyadda isagoo la tashaday Golaha dhexe ee XHKS.iyo Guddiga joog-tada ha ee Golaha Shacbiga.

**3**.Doorashada Golaha Cusubi waxay dhacaysaa Saddex bilood gudahood ,laga bilaabo maalinta lagu dhawaaqo go’aanka kala dirka Golaha.

## Qod. 64aad
### ( Kalfadhiga )

**1.**Golaha Shacbiga Sannadkiiba wuxuu yeelanayaa labo kalfadhi

**2.**Goluhu wuxuu isugu  imaan karaa fadhi aan caadi ahay markii uu sidaas go'aan ku gaaro Guddiga joogtada ah, ama ay codsadaan Saddex meelood meel Xildhibaanada Goluhu.

**3**.Madaxweynaha JDS wuxuu awood u leeyahay inuu Golaha isugu yeero fadhi aan caadi ahayn.

## Qod. 65aad
### ( Fadhiyada iyo go'aannada Golaha )

**1.**Golaha Shacbigu wuxuu fadhigiisa ugu horeeya ka dhex doora-naya Xubnihihiisa Gudoomiye.Gudoomiyo ku xigeeno iyo Guddiga joogtada ha.

**2**.Fadhiyada Goluhu waa u furan yihiin Dadweynaha. hase yeeshee fadhiyo qarsoodi ah waa la qaban karaa hadii ay soo jeediyaan Madaxweynaha Jamhuuriydda, Guddiga joogtada ah Dawlada ama ugu yaraan afar meelood meel xildhibaanada, Goluhu ogolyahay

**3**.Fadhiga Goluhu wuxuu ku ansaxayaa matka ay ka soo qayb Galaan Xildhibaanada intooda badan

**4.** Go'aanka Goluhu waxay ku ansacayaan Cod hal dheeri  hadii Dastuurka ama Sharcigu uusan tilmaamin aqlabiyad gaar ah

## Qod. 66aad
### ( Xeer Hoosaadka Golaha )

Habka Shaqada Golaha Shacbiga waxaa lagu nidaaminayaa Xeer hoosaada Goluhu guddoonsado.

## Qod. 67aad

## ( Awooda Golaha )

Awooda Shacbigu wuxuu leeyahay awdoodaha soo socda:-

**1.** Wax ka beddelida Dastuurka Dalka
**2.** dejinta sharciya iyo Ogolaanshaha go'aannada saameya hor-uumarka D
**3**. Doorashada iyo xil ka qaadida Madaxweynaha JDS sida ku cad Qod.80aad ee Dastuurka.
**4**. doorashada iyo xil ka qaadida, Guddiga joogtada ah ee Golaha S
**5**. Oggolaanshaha heshiisyada caalamiga ah ee ku saabsan siyaa-Sadda, Dhaqaalaha, ganacsiga ama heshiisyada Qaranka u keenaya mas'uuliyad lacageed
**6.** hubinta dhawrida dastuurka iyo Sharciyadda Dalka
**7**.Ogolaanshaha qorshaha horuumarinta Dhaqaalaha Dalka
**8**.Oggolaanshaha Miisaaniyadda Sannadka iyo Miisaaniyadda Xisaab xirka dalka.
**9**. La xisaabtanka Dawlada iyo Xubnaheeda.
**10**.Awdoodaha kale e Dastuurka siiyey Golaha

## Qod. 68aad

## ( Xilsaarasho Sharci Dejin )

**1.**Golaha Shacbigu wuxuu dawladda u wakiilan karaa inay ka soo saarto Sharci,wakhti xaddidan gudahiis, arrimo la isla meel dhigay, Sharciga Xilsaarashada waa lagu tilmaami karaa mabaadi'da ama tusaalooyinka in Dawladdu raacdo loo baahan yahay

**2.** Sharciga Dawladda loo wakiishay waxaa lagu soo saarayaa xeer Madaxweyne.

## Qod. 69aad

## ( Sharciyada degdegga ah )

**1**.Markii ay jiraan duruuf gaar ahaaneed oo dedeg ah Dawladu waxay dejin kartaa Sharci leh dhaqan ku meel gaar ah oo lagu soo saaro Xeer Madaxweyne .mudo Bil ah gudaheed waa in sharcigaas lagu horgeeyaa Golaha Shacbiga, ama guddiga joogtada a, si loogu dhigo mid rasmi ah.

**2**.Golaha Shacbigu, hadii uu kulansan yahay ama Goluhu kulansa-nyahay, ama guddiga joogtada ah,marka Goluhu kulansanayn waa inay go'aan ka gaaran 15 Maalmood gudahood laga bilaabo Taariikhda Sharciga la soo hordhigay.

## Qod.70aad

### ( Talo-Sharci )

**T**alo Sharci waxaa soo jeedin kara Madaxweynaha JDS guddiga joogtada ah iyo Dawladda, waxaa kaloo talo sharci soo jeedin kara Xildhibaanada Golaha Shacbiga hadii ay soo jeedintaa isku raacaan Saddex meelood meel Xildhiba-aanada Golaha

## Qod.71aad

### ( Sharciyada saameynaya Istraatijida Xisbiga )

Mashruuca ama talo sharci oo kasta ee saameynaya istraatejida Xisbigu ku xaqiijinayo himilooyinka iyo nidaamka uu dalka ku hogaaminayo waa in golaha dhexe ee Xisbigu soo oggolaadaa.

## Qod.72aad

### ( Soo saarida iyo faafinta Sharciga )

**1.** Sharci kasta ee Golaha Shacbiga ama Guddiga joogtada ah isku raaco waxaa soo saaraya, Madaxweynaha JDS wuxuu awood u leeyahay, muddada ku xusan Lambarka 1aad ee qodobkan dhexdeeda, in uu sharcigaas dib uga celiyo Golaha Shacbiga, isagoo sababta raacinaya, codaynayana In dib looga doodo, go'aanada laga gaaro.

**2**. Hadii Goluhu mar kale saddex meelood laba Xubnihiisa Sharcigaas isku raaco. Madaxweynuhu waa inuu soo saaraa Afartan iyo Shan (45 ) Maalmood gudahood

**3** Sharciga Goluhu isku raaco, Madaxweynuhuna soo saaro Waxaa lagu baahiyaa Faafinta Ramsiga ah, wuxuuna dhaqan galayaa Toban iyo Shan ( 15 ) maalmood ka dib, marka lagu soo saaro faafinta Ramsiga ah, haduusan Sharcigu ka duwan sheegin

## Qod.73aad

**( X I L D H I B A A N A K A )**

**1.** Xildhibaanku kasta wuxuu masilyaa danta guud ee Dadweynaha Soomaaliyeed.

**2.** Xildhibaanku marka uu hawsha Golaha bilaabayo wuxuu Marayaa Dhaarta soo socota:

< Waxaan Magaca Illaahay iyo kan Waddanka ku Marayaa Inaan ammaano, kalsooni iyo hagar la'aan ugu adeego Shacbiga Soomaaliyeed, inaan fuliyo mabaadi'da 21 oktoobar 1969. Inaan dhowro dastuurka iyo Shuruucda Dalka. Inaan hirgeliyo Mabaadi'da hantiwadaagga inaan Illaaliyo danta guud ee Shacbiga iyo danaha Qaranka Soomaaliyeed . Inaan kartidayda oo dhan ku difaaco Xorriyadda, Madaxbanaa-Nidda iyo Midnimada dalka, inaan danta guud ka horuumarina-yo dantayda gaar ahaaneed, inaan Dadka Soomaaliyeed ku Dhaqo sinaan iyo Caddaalad hadii Illahay idmo >

**3.** Xildhibanka dhibaato kama soo gari karto fikradaha iyo aaraada uu ka hor dhiibto Golaha iyo Guddiyadiisa isagoo gudanaya Xilkiisa.

**4.** Xildhibaanka Golaha laguma qaadi karo dacwad Ciqaabeed, lama xiri karo, lamana baari karo qof ahaan ama hoygii

**5.** Xildhibaanka Goluhu wuxuu xilkiisa gudanayaa isagoo wata Hawlihiisii hore ee caadiga ahaa inta ay socdaan kalfadhiyadu ama marka loo diro hawl la xiriirta Xilka Golaha Xildhibaanku wuxuu xaq u yeelanayaa gunno lagu xaddidi doono Sharciga gaar ah.

## Qod.74aad

**( Xil ka qaadidda Xildhibaanka )**

**1**.Xildhibaan kasta ee oofin waaya Shuruudaha Xildhibaanimada, ama ka soo bixi waaya waajibaadka Xilkiisa la xiriira waxaa laga qaadayaa Xilka.

**2.** Xildhibaan kasta Dadweynihii soo doortay waa kala noqon karaan kalsoonidooda, waxaana codsigaas soo jeedin kara Afar meelood meel doortayaasha.

**3.** Xil ka qaadidda Xildhibaanka waxaa hal dheeri xubnihiisa ku ku gudoominaya Golaha Shacbiga.

## Qod.75aad

**( Kormeerka Golaha )**

**1.**Xildhibaan kadta wuxuu xaq u leeyahay inuu u jeediyo Dawlada ama xubmaheeda su'aalo iyo afti oo ay waajib ku tahay inay ka Jawaabaan Labaatan Maalmood gudahood.

**2.**Goluhu wuxuu amri karaa in baaris la sameeyo isagoo u xilsaaraya Waajibkaas Guddiyo ka kooban Xildhibaano.

## XUBINTA LABAAD

**Guddida Joogtada ah**

## Qod.76aad

**( Xilka Guddiga Joogtada ah )**

Guddida joogtada ah waa hay'adda hogaaminaysa hawlaha Golaha kuxuuna qabtaa xilka Golaha Shacbiga, muddada u dhaxeeya kalfadhiyada, marka laga reebo awoodaha ku xusan.Qod 67aad Lambaradiisa: 1,3,7 iyo 8 , iyo Qod.82aad,Lambaradiisa 3&12 ee Dastuurka

## Qod.77aad

**( Xubnaha Guddiga Joogtada Joogtada ah )**

**1.**Guddiga joogtada ah wuxuu ka koobanyahay Xubhanah soo socda:-

- Gudoomiye
- Gudoomiye ku xigeen
- Xoghaye iyo Toban Xubnood

**2**. Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku xigeennada Golaha Shacbiga ayaa noqonay Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeennada Guddida joogtada ah.

## Qod 78aad

**( Awooda Guddida joogtada ah )**

Guddida joogtada wax ka beddelida Sharciyada Golaha, isagoo ka dib ka ansaxinaya Golaha Shacbiga.

**1.**Dejinta iyo wax ka beddelida Sharciyadda muddada u dhaxeeya kalfadhiyada Golaha, isagoo ka dib ka ansaxinaya Golaha Shacbiga

**2.**Fasiraada Sharciyadda iyo go'aannnada Goluhu soo saaro.

**3**.Isugu yeeridda kalfadhiga iyo fadhiyadda aan caadiga ahayn ee Golaha Shacbiga.

**4**.Ilaalinta maamulka doorashada Xildhibaannada Golaha Shacbiga

**5.**wax alla wixii awood ah ee Dastuurku siiyey ama Golaha Shacbigu u xilsaaro.

# MADAXA LABAAD

## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa Madaxa Qaranka.wuxuuna masilaa awooda Qaranka iyo midnimada Shacbiga Soomaaliyeed.

### Qod. 80aad

**( Doorashada iyo muddada Xilka )**

**1.**Madaxweynaha Jamhuuriyadda waxaa soo saar sharaxaya Golaha dhexe ee Xisbiga Hantiwaadaaga Kacaanka Soomaaliyeed. Golaha Shacbiga ayaana dooranaya.

**2**. Doorashada Madaxweynaha waa in ay isku raacaan Saddex meelood Laba Xildhibaanada, Golaha Shacbiga .aftida koowaad iyo Labaad saddexaad waxaa ku filan cod hal dheeri ah Xildhibaannada Golaha

**3.**Golaha Shacbiga waa casili karaa Madaxweynaha isagoo raacaya hababka ku xusan lambarka Labaatan iyo kowaad (21 ) ee Qodobkan

**4.**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya, wuxuu Xilka haynayaa Lix sanno, laga bilabo maalinta la dhaariyo, dibna loo dooran karaa.

**5**. Marka uu hawsha bilaabayo, Madaxweynaha Jamhuuriyaddu wuxuu marayaa dhaarta ku xusan Qod.73aad ee Dastuurka.

### Qod. 81aad

**( Shuruudaha Doorashada )**

Waxaa loo dooran karaa jagada Madaweynaha JDS. Qof kastoo Soomaali ah, Aabihii iyo Hooyadiina Asal ay Soomaali yihiin horey aan u guursan, intuu Xilka hayana guursanin Qof aan Soomaali Aheyn, lehna Shuruudaha lagu dooran karro Xildhibaanka Golaha Shacbiga, da’diisuna gaartay Afartan sanno ( 40 ).

## Qod. 82aad

**( Hawsha iyo Awooda Madaxweynaha )**

Madaxweynaha Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya awooda iyo hawlaha Dastuurka iyo Sharciyaddu siinayaan waxaa u weheliya kuwa soo socda.

**1**. Masilaada xiriirka Qaranku la leeyahay

**2 .**Masilaada midnimada hogaanka siyaasadeed ee Xisbiga iyo Qaranka

**3.** Meelmarinta heshiisyada Calamiga ah ee saameynaya difaaca & nabada Qaranimada iyo Madaxbanaanida, Jamhuuriyada, ka dib marka ay ogolaadaan Golaha Dhexe ee Xisbiga iyo Golaha Shacbiga.

**4**. Meelmarinta heshiisyada kale ee caalamiga ah.

**5.** Qaabilaada iyo aqoonsiga Danjirayaasha iyo Madaxda ergooyinka shisheeye.

**6**. Gudoominta shirarka ay ku wada jiraan Hay'adaha Xisbiga iyo kuwa Qaranka.

**7.** Magacaabida iyo xilwareejinta wasiiro ku xigeennada.

**8.**Magacaabida iyo Xil wareejinta Gudoomiyaha Maxkamadda sare iyo xeer ilaaaliyaha guud ee Qaranka. Isagoo dhagaysanaya talada Golaha Dhexe ee Xisbiga:

**9**.Magacaabida iyo Xil ka qaadidda Saraakiisha sare ee Qaranka isagoo dhagaysanaya talada Golaha Wasiirada.

**10.** Inuu bixiyo masaabax ( cafin ), ciqaabtana dhimo.

**11.** waa Taliyaha sare ee Ciidamada Qaranka sida iyo gudoomiyaha Guddiga Difaaca Qaranka.

**12**. Ku dhawaaqida xaalada dagaalka iyo nabada, ka dib marka ay go'aamiyaan golaha dhexe ee Xisbiga iyo Golaha Shacbiga.

**13**. Inuu Dadweynaha u bandhigo afti markii ay dalka la soo gudbaanaadaan arrimo muhiim ah

**14**. Inuu soo saaro Xeerar Madaxweyne:

**15**. Bixinta Billadaha iyo aqoonsiyada Mudnaanta kale.

## Qod. 83aad

**( Awooda aan Caadiga ahayn ee Madaxweynaha )**

**1.**Madaxweynaha , Jamhuuriyada Dimooqraadiga Soomaaliya wuxuu awood u leeyahay, isagoo la tashaday, Guddiga Difaaca Qaranka , inuu xukun degdeg ah ku soo rogo, tilaabo kasta oo ku haboonna ka qaaado, Dalka guud ahaantiisa ama qaybo ka mid ah, marka ay la soo gudboonaato arrimo khatar galinaya Qaranimada nabadgelyada gudaha ama dibedda ee Dalka .ama markasta oo ay jirto baahi lagama marmaan ah.

**2.**Xaaladaha dagaalka, Madaxweynuhu wuxuu la wareegayaa awooda Dalka oo dhan, ku dhaqanka qodobbada Dastuurka ee aan la socon karin xaaladaha wa la laalayaa.

## Qod. 84aad

**( Madaxweyne ku Xigeennada )**

**1.**Madaxweynaha Jamhuuriyyda Dimoqradiga Soomaaliya wuxuu Magacaabi karaa Madaxweyne ku xigen ama madaxweyno ku Xigeeno, isagoo dhagaysanaya ra'yiga Golaha dhexe ee Xisbiga iyo Golaha Shacbiga.

**2**. Madaxweyne ku xigeennadu marka ay hawshooda bilaabayaan waxay marayaan Dhaarta ku xusan Qod.73aad ee Dastuurka

## Qood. 85aad

**( Xil gudasho karid la'aan )**

**1.** Marka ay geeru ku timaado, ama shaqo ka fakirid ama sabab joogto ah ee ka reebaysa Madaxweynaha JDS inuu xilkiisa guto, waxaa la dooranayaa Madaxweyne cusub lixdan casho gudahood, iyadoo la raacyao habka ku xusan Qod.80aad Dastuurka.

**2**. inta ay doorashadu madaxweynaha Cusb ka dhacayso iyo markastoo ay jiraan sababo aan joogto ahayn ee ka reebaya Madaxweynaha inuu guto xilkiisa, waxaa jagadiisa sii haynaya Madaxweyne ku xigeenka Kowaad ee Jamhuuriyadda

## MADAXA SADEXAAD
## D AW L A D D A

## XUBINTA KOOWAAD
## MAAMULKA DAWLADA DHEXE

### Qod. 86aad
### ( Golaha Wasiirrada )

**1**. Golaha Wasiirradu waa hay'adda ugu sareysa fulinta maamulka Dawlada.
**2** Golaha Wasiirradu wuxuu ka kooban yahay Gudoomiyaha Wasiirrada.
**3.** Guoomiyaha Golaha wasiirrada waxaa noqonaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.
**4.** Madaxweynahu wuxuu magacaabi karaa hadii ay habboonato, Wasiir Kowaad

### Qod. 87aad
### ( Awooda Golaha Wasiiradda )

Awoodaha Dastuurka & Sharciga siinayo ka sokow,Golaha Wasiiradu Wuxuu leeyahay awoodaha soo socda.

**1.** Inuu hordhigo Golaha Shacbiga talooyin sharci:

**2.** Inuu jiheeyo, iskuna duwo kormeerana hawlaha Dawladda:

**3.** Inuu soo saaro xeerar:

**4.** Inuu hogaamiyo hawlaha la xiriira Difaaca Dalka iyo nadab-Gelyadda Qaranka:
Inuu diyaariyo miisaaniyad Sannadka iyo Xisaab xirkeeda:

**5.** Inuu dejiyo qorshaha lagu horuumarinayo Dhaqaalaha Dalka:

**6.** Inuu heshiisyo la galo Waddammada Dibedda iyo Hay'adaha Caalamiga ah:

**8**. Inuu qaado tallaabo kastoo uu ku ilaalinayo danta Qaranka iyo nabadgelyada Dadweynaha, isagoo dhowraya xadka Dastuurku u gooyey awooddiisa

## Qod. 88aad
### ( Nidaamka  Dawladda )

**1.** Awoodaha iyo xilka Golaha wasiirada ee aan Dastuurkan ku xusnayn, tirada iyo xilka wasaaradaha, waxaa lagu cadeynay-nayaa sharci gaar ah

**2**. habka dhismaha Golaha Wasiirada, Wasaaradaha iyo Xafiis-yada la xiriira, waxaa lagu nidaaminayaa Xeer madaxweyne.

## Qod. 89aad
### ( Mas'uuliyadda ciqabeed ee Wasiirada )

**1.** Wasiiradu waxay mas'uul ka yihiin dembiyda ka dhasha fulint-xilkooda.

**2** .Sharciga aya tilmaamaya habka Wasiirada loogu qaadayo dem-biyada ka dhasha fulinta xilkooda iyo dembiyada kaleba.

## Qod. 90aad

### ( Dhaarta )

**X**ubnaha Dawladda , marka ay xilkoda bilaabayaan, waxay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya. hortiisa ku marayaan Dhaarta ku xusan Qod.73aad ee Dastuurka

## Qod.91aad

### ( Barnaamijka Dawladda )

**D**awlad magacaabideeda ka dib waxay Golaha dhexe ee Xisbiga iyo Golaha Shacbiga soo hordhigayaa Barnaamijka ay doonayso inay hirgaliso.

## Qod. 92aad

### ( Wasiirro ku Xigeenno )

**W**asiirrada waxaa xilkooda ku kaalin kara Wasiirro ku xigeenno uu maagacaabo maamulka dhexe JDS, isagoo dhageysanaya talada Golaha wasiirrada.

## XUBINTA LABAAD

### BAAHINTA AWOODA IYO MAAMULKA DALKA

### Qod .93a

### ( Fidinta Maamulka )

**X**ilka maamuleed ee Qaranka waxaa lagu fidinayaa inta ay suurto galtahay,maamukla hoose ee Wakaaladaha.

### Qod.94aad

### ( Mamulka Hoose ee Qaranka )

**1.** Awooda maamulka hoose waa qayb ka mid ah maamulka dhexe ee Jamhuuritadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

**2.** Sharciga ayaa nidaaminaya awoodda maamulka hoose, si waafaqasan Mabda'a Dimoqradiyadda gudoonka dhexe.

### Qod.95aad

### ( Golaha Shacbiga ee Deegaaanka )

**1** Dadweynuhu si toosa ayuu u dooranayaa Xubnaha Goloyaasha Shacbiga ee Deegaanka.

**2.** Sharcigu wuxuu tilmamayaa dhismaha awooda, ilaha dhaqaalaha iyo xiriirka Goloyaasha Shacbiga ee deegaaanku la leeyihiin xisbiga , Golaha Shacbiga iyo Dawladda.

## M A D A X A   A F R A AD

## GARSOORKA

## X U B I N T A  K O O W A A D

## MABAADI'DA GARSOORKA

### Qod. 96aad

**( Ujeeddada Garsoorka )**

1. Maxkamadaha iyo xeer Ilaalinta waxy ilaalinayaan nidaamka Qaranka Hantiwadaagga iyo Dhismihiisa Bulsho.

2. Maxkamadaha iyo xeer ilaalinu gudashada xilkooda, waxay ku barbaar-nayaan muwaadinka Soomaaliyeed inuu ka qayb qaato dhismaha Dalka, difaaca nidamka, hantiwadaagga, dhowrista sharciyadda habka wadano-noolaanshada Bulshadeed iyo daacadnimo waajibaadka Qaranka iyo Qa-ranka ku leeyihiin.

3. Garsooruhu wuixuu sugaa dhawridda sharciyada, wuxuuna kafaalo qaa-qaadaa ilaalinta xorriyada, xuquuqda iyo muwaadinka, danaha iyo shar-afta Qofka aadamiga ah.

### Qod.97aad

**( Midnimada Garsoorka )**

Garsoorka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa mid midaysan

### Qod.98aad

**( Madaxbannida Garsoorka )**

Garsoorayasha Maxkamada iyo xeer illaaliyaashau waa madax banaanyih-iin hawshooda , lagama qaadi karo xilka , xaaladaha shircigu tilmamay mooyaane, waxayna u hogaansamayaan Sharciga oo keliya.

### Qod.99aad

**( Doodaha Maxkamadaha )**

**1.** Doodaha  Maxkamaduhu, mabda'a ahaan waa tirab, Dadweynuhuna waa dhagaysan karaa, Sharciga ayaa tilmamaya xaaladaha, Maxkamadah irridaha loo xiri karo.

**2.**Xukunka Maxkamadaha waxaa lagu soo saaraya Magaca Dadweynha Soomaaliyeed .

## X U B I N T A   L A B A A D

## MAXKAMADAHA

### Qod.100

### ( Maxkamadaha jamhuuriyadda )

**1.**Maxkamadaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa kuwa Kuwa soo socda:

- Maxkamadaha Gobollada
- Maxkamadaha Deegmooyinka
- Guddiyada Garsoorka
- Guddiyada Garsoorka, ee goobaha shaqada, iyo Maxkamadaha Ciidamada Qalabka sida.

**2**. Waxaa la dhisi karaa Maxkamadaho gaar ah ee awooddooda iyo dhismahooda lagu jideeyey Sharci.

**3.** Guddiyada Garsoorka ee Maxkamdaha , waxaa ka qayb gala Garsoorayaal Dadweyne ee Sharci gaar ah lagu dhisay.

### Qod.101

### ( Maxkamadda sare )

Maxkamadaha waa hay'adda ugu sareysa Garsoorka JDS. waxay habeysaa, kormeertana hawlaha Maxkamadaha oo dhan.

### Qod.102

### ( Habka shaqada Maxkamadaha

Habka shaqada Maxkamadaha Jamhuuriyadda Dimoqradiya Soomaliya iyo magacaabida Garsoorayaasha waxaa nidaaminaya Sharci gaar ah.

## X U B I N T A  S A D D E X A AD

### XEER ILAALINTA

### QOD.103

**( Xeer ilaalinta Guud ee Qaranka )**

1. Xeer ilaalinta Guud ee Qaranku waxy ka koobantahay Xeer ilaaliyaha Guud iyo ku xigeenanadiisa.

2. Qaabka dhismaha xeer ilaalinta Guud iyo Hawlaha Xubnaheeda waxaa nidaamiyan sharci gaar ah..

### Qod. 104aad

**( Xilka xeer ilaalinta Guud ee Qaranka )**

1. Xeer ilaalinta guud ee qaranku waxay ilaalisaa ku dhaqanka dhabta ah ee Sharciyada Dalka.

2. Waxay hubisaa in go'aanad, awaamiirta iyo tusaalooyinka, Hay'ada-ha Qarnaku  waafaqsan yihiin Dastuurka iyo Sharciyada Dalka.

3. Waxay dacwad ku oogtaa Qofkii gala fal dambi ah.

4. Waxay kormeertaa Xabsiyada iyo xarumaha dib u edbinta Caruurta.

5. Waxay ilaalisaa xaquuqda Dadka tamarta yar.

6. Waxay fulisaa hawlihii kale ee Shrcigu u xilsaaro.

## X U B I N T A   A F R A A D

### GOLAHA SARE EE GARSOORKA

### Qod.105aad

### ( Xilka Golaha sare ee Garsoorka )

1. Golaha sare ee garsoorku waa hay'adada hogaamisa siyaasadda iyo maamulka guud ee Garsoorka.

2. Golaha sare ee garsoorku wuxuu talo ka dhiibtaa masaabaxada Madaweynaha Jamhuuriyadu bixiyo,magacaabida,beddelka,dalacaada iyo xeer ilaaliyaasha.

3. Wuxuu kormeeraa hawlqabadka iyo anshaxa Garsoorayaasha iyo Xeer ilaaliyaasha

### Qod.106aad

### ( Gudoominta Golaha Sare ee garsoorka )

**M**adaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ayaa ah Gudoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka.

### Qod.107aad

### ( Dhismaha Golaha sare ee Garsoorka )

**D**hismaha Golaha sare ee garsoorka iyo habka waxaa nidaaminaya Sharci gaar ah.

## Q A Y B T A   S H A N A A D

### DIFAACA IYO NABADGELYADA DALKA

### Qod.108aad

### ( Xilka Ciidamada qalabka sida )

1. Ciidamada qalabka sida waxy ilaalinayan gobannimada iyo madaxba-naanida Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxay guulaha iyo iyo miraha Kacaanka ka ilaalinayaan cadowga gudaha iyo kandibeda,waxay sugaan nabadgelyadada iyo xasiloonida gudaha, kaalina ka qaataan dhismaha Dalka.

2. Qaranku wuxuu xoojinayaa awooda iyo aqoonta farsamo ee Ciidanka Qalabka, sida kor u qaadidda garaadkooda siyaasadeed ku beeridda Ruuxa waddanimo iyo naf u hurida Dhulka Hooyo.

## Qod.109aad

### ( Dhismaha Ciidammada qalabka sida )

Sharci u gaar ayaa tilmaamaya dhismaha iyo qaabka ay u habeysanyihiin Ciidamada qalabka sida.

## Qod.110aad

### ( Guddiga Difaaca Qaranka )

1. Guddiga Difaaca Qaranka xilkiisa wuxuu yahay inuu qiimeeyo xaaladaha la xiriira difaaca iyo nabadgelyada Dalka. gurmadiyana wax kasta oo waxtar u leh haqabtirka baahida Difaaca Dalka.

2. Guddiga Difaaca waxaa Gudoomiye ka ah magacaabana xubnihii-sa kale, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

3. Sharciga ayaa tilmamaaya awoodda guddiga Difaaca qaranka waqtiga nabadda iyo Dagaalkaba.

# Q A Y B T A L I X A A D

### QODOBO KALA DUWAN

## Qod.111aad

### ( Saldhiga Sharciyadda )

**1.**Dastuurku wuxuu leeyahay awooda sharci ee ugu sareysa

2.Dhaman shuruucda, Xeerarka iyo awaamiirta hay'adaha Qaranka waxaa saldhig u ah Dastuurka JDS. waana in ay waafaqsanaadaan

## Qod.112aad

### ( Wax ka bedelka Dastuurka )

1.Talo wax ka beddel Dastuurka waxaa soo jeedin kara:
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya Golaha dhexe ee Xisbiga iyo sadded meelood meel Xildhibaannada Golaha Shacbiga.

2. Golaha Shacbiga wax ka bedelka Dastuurka wuxuu gudoominayaa go'aan ay isku raacaan, sadex meelood meel xubnihiisa.

3. Wax ka bedelka Dastuurka ma saaameyn karo arrimaha soo socda:
a).Nidaamka Jamhuuriyadnimadda ee Dalka
b) Doorashada mabda'a Hantiwadaaga.
t) .Midnimada Dhulka
j). Xuquuqda iyo xorriyadaha asaasiga ah ee Muwaadinka iyo Qofka

## Qod.113aad
### ( Ku dhaqanka ku meel gar ah )

1.Shahrciyada hadda jira waa lagu sii dhaqmayaa, iyadoo intooda aan Dastuurka waafaqasaneyn lagu bedeli doono hal sanno gudaheed.

2.Ilaa inta laga dhisayo hay'adaha dastuurkani tilmaamayo, awoodahooda waxa sii fulinaya hay'adda imminka ka jirra Dalka.

## Qod.113aad
### ( Dhaqanka Dastuurka )

Dastuurka wuxuu dhaqan galayaa laga bilabo maalinta la soo saaro natiijada aftida oggolaanshaha Shacbiga.

- - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - -

Fiiro Gaar ah: Taariihdu waa tilmaanta iyo tusmada Asal raaca Dal iyo Dadkiisa. Waxaana lama huraana inaad illaaliso ood dhowrto . hadii ay fiicantahay iyo haday xuntahayba

**Kaydintii:**Mahdi Farah Aden (Mahdi Ghandi )
Amsterdam / Holland | Email: farahaden99@hotmail.com